



Comisiynydd Pobl Hŷn Cymru
Older People's Commissioner for Wales

Xirfadaha Dhakhaatiirta joogta ee Wales: Hagaha xaquuqooyinkaaga



Ogaaw xaquuqooyinkaaga

Xaquuqooyinkeena waxay naga caawin karaan anaga oo ku jirna xaalado badan oo maalin walba ah, oo ay ku jiraan dhaqamada GP-ga.

Ogaanshaha xaquuqdeena waxay naga caawin karaan inaan fahano adeegyada oo ay tahay in la heli karo, waxyaabaha xaqa aan u lenahay, iyo taageerada iyo isbeddelka oo yahay in la bixiyo haddii aan u baahanahay ayaga.

Sidaas darteeda waa mhiim in la xasuusto haddii aad ku nooshahay Wales, waxaad xaq u leedahay inaad:

- Ka diiwaangashan tahay Dhakhtarka.
- Qabsato ballanta cusub ee bukaanka oo ah lix bilood gudahooda laga soo bilaabo ee diiwaangelinta.
- U hesho dhakhtarkaaga shaqsi ahaan, taleefoon ahaan iyo onlaayin ahaan ingta lagu gudi jiro saacadaha uu furan yahay.
- Ballanta aad qabsaneyso isla maalintaas tahay haddii dhakhtarkaaga uu go'aamiyo in baahidaada ay tahay mid degdeg ah.
- Sheeg inaad doorbiddo oo aad la kulanto xirfadle daryeelka caafimaadka oo gar ah.
- Waraaqadaha daawada ee bilaashka ah oo laga helo farmashiistaha ee ku yaala Wales (haddii aad ka diiwaangashan tahay GP-ga jooga Wales).
- U hesho macluumaadka dhakhtarkaaga iyo adeegyada qaab adiga aad ku qanacsan tahay.
- U hesho macluumaadkaaga caafimaadka ee gaarka ah, ama xaaladaha gaarka ah waxaa lagu qoreyaa diiwaanka caafimaadka ee qofka dhintay.
- Wixii Macluumaad ah oo aad siiso dhakhtarkaaga waxaa loola dhaqmayaa si kalsooni ah.
- Buugyaraha oo macluumaadka ah kaas oo sharxaya adeegyada kala duwan oo bixiyo dhalhtarkaaga.
- Macluumaadka sida loo helo caawinaad iyo talo.
- Noocyada luuqadda Welsh wixii dukumiinti ah oo ay bixiyaan Guddiga Caafimaadka
- U wareeji diiwaangelintaada dhakhtar kale.

Bixinta adeegyada loogu talagalay bukaanada

Marka laga soo tago ogaanshaha xuquudeena, waxaa sidoo kale muhiim ah in la ogaado waxyaabaha ay tahay in GP-ga Wales joogo inuu sameeyo marka la siinaayo adeegyada loogu talagalay bukaanada.

GP-yada joogta ee Wales waa inay:

- Siiyaan adeegyada loogu talagalay dadka qaba xaaladaha caafimaadka oo ay rajeynayaan inay ka soo kabsadaan, maareeynta cudurada daba dheeraaday iyo maareeynta guud ee bukaanada xanuunka la dhimanaya.
- Bixi adeegyo woqtiyada ku fiican si loo daboolo baahiyaha macquulka ah ee bukaanada.
- Hubi in dadka ay u heli karaan adeegyada GP-ga si hufan oo khad la'aan ah iyo onlaynkaba.
- In la hubiyo in bukaanada ay heli karaang adeegyada inta lagu gudi jiro saacadaha muhiimka ah oo dhan marka ay jirto xaaladaha degdeg ah.
- Albaabada 'goobyada ugu muhiimsan' ha furaan oo shaqaalaha ha joogaan goobta inta u dhaxeysa 8.30 suxbanimo iyo 6.00 galabnimo
- Waxaad ku bixisaa salaanta la duubay ee Ingiriisi iyo Welsh ahaan ee taleefoonka.
- Waxay kuu sheegeysaa haddi ay jirto in la bixinaayo lacag loogu talagalay adeega.
- Tixgeli waayo-aragnimada dadka ee helitaanka iyo isticmaalka adeegyadooda isla markaana aad qaadato tallabo u qalanta ah oo wax looga qabanaayo wixii arrimaha sinnaanta ah.
- Qabso, diiwaangeli, calaamadeey, oo lana wadaag baahiyahaada isgaarsiinta haddii aad la nooshahay lumid dareen leh.
- In la hubiyo wixii calaamado ah iyo ogeysiisyo cusb ah oo ku saabsan adeegyada NHS-ta ay yihiin kuwo laba luqadood ah; af Ingiriiska iyo Welsh.

Shaqada wanaagsan

Waxaa intaa dheer, waxaa jiro waxyaabo kale oo ay tahay in la sameeyo shaqada GP-ga si loogu caawiyo in dadku ay heli karaan adeegyada iyo taageerada ay u baahan karaan.

Shaqadaan wanaagsan waxaa ka mid ah:

- Siismada isku dhafka oo meel fog ah (taleefoon ama muuqaal), fool ka fool, degdeg ah, maalinta iyo ballamaha horay loo qabsan karo, oo go'aamiyay dhaqhtarka marka lala xaajonaayo buukaannada.
- Daaweynta codsiga onlaynka si la mid ah habka codsiga taleefoonka.
- Ku siinaayo la-talin wanaagsan marka ugu horeyso aad la xariireyso dhakhtarkaaga, iyada oo lagu saleynaayo qiimeynta baahidaada caafimaadka.
- Bixinta adeega taleefoonka kaasoo si buuxda u daboolaaayo baahiyaha bukaannada.
- Tixgelinta waayo-aragnimadaada oo aad ka heleyso ayaga onlaynka iyo taleefoon ahaan.
- Lagu weydiinaayo luuqadda aad doorbidday iyo in la geliyo diiwaanka iyada.
- Qoritaanja runta ah inaad daryeeleyso qof kale.

Wax badan hel

Gaddoomiyaha ayaa soo daabacay hage wax badan faahfaahsan - ***Xirfada GP-ga jooga Wales: Hagaha oo loogu talagalay Dadka Waayelka ah*** - kaas oo ku siinaya macluumaad ku saabsan wax walba oo laga soo bilaabo diiwangelinta dhakhtarka, sameynta iyo ka qaybgalka ballanta, iyo doorarka kala duwan ee shaqaalaha ee hadda caanka ku ah hirfadaha GP-ga.

Haddii aad jeclaan lahayd nuqul oo ah hagaha, fadlan wac 03442 640 670.

Waxaad sidoo kale kala soo degi kartaa hagaha bogga intarneedka ee Gaddoomiyaha: olderpeople.wales.

Xiriirada muhiimka ah

Haddii aadka welwelsan tahay in GP-gaaga aan kuu daaweynaynin si cadaalad ah ama aan ku siineynin adeegyada iyo taageerada saxda ah si uu u daboolo baahiyahaaga oona dhooro xuquuqdaada, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad si toos ah arrintaan kor ugu qaado GP-gaaga ama guddigaaga caafimaadka.

Faahfaainnada xiriirka ee hay'addaha kale kaas oo bixin kara macluumaadka iyo taageerada ayay sidoo kale ku soo dareen hoos:

NHS 111

Garaac 111 ee taleefoonka 111.wales.nhs.uk

Llais

02920 235 558 llaiswales.org

Adeega Talo bixinta iyo Sinnaanta Taageerada

0808 800 0082 equalityadvisoryservice.com

Guddiga Dadka Waayeelka ee Wales Adeega Talo bixinta iyo Gargaarka

03442 640 670 olderpeople.wales

www.olderpeople.wales



Comisiynydd Pobl Hŷn Cymru
Older People's Commissioner for Wales